

SMITTSKYDDSBLAD

Patientinformation

Latent tuberkulos när behandling ges

Översatt till somaliska

Version 2022-04-11

Qaaxada qarsoon, macluumaadka bukaan socodka

Marka daawaada ka hortegeysa la bixinayo. Warqad ku saabsan macluumaad khuseeya dhakhaatiirta xakamaysa cudurada faafa

Sidee qaaxada lagu kala qaadaa?

Qofka qaba qaaxada sambabada waxa uu qaadiin karaa dadka kale marka uu qofku meel guri gudihiis uu joogo ee uu qufaco. Qaaxada xubnaha kale ku dhacda iyo qaaxada qarsoon midna lama kala qaado. Ma aha wax caadi ah in carruurta intaanay baaluqin qaaxada laga qaado. Khatarta ugu weyn ee isku daarashada waa marka ay dadku wakhti dheer meel wada joogeen, tusaale ahaan dadka isla deggen ee isku qoyska ah.

Waa maxay qaaxada qarsoon?

Ma aha in dhammaan qof kasta oo qaada qaaxada uu u jirado cudurka. Dadka intooda badan, difaaca jirka ayaa iska caabiya in aanay bakteeriyadu kobcin ama korin. Bakteeriyadu way ku sii jiri kartaa jirka laakiin ma aha mid firfircoon. Xaaladdan waxaa lagu magacaabaa **qaaxada qarsoon**.

Qaaxada qarsooni maaha cudur

Marka adiga lagaa qaado tijaabada dhiiga kadib (tijaabada IGRA) ama tijaabada maqaarka jirka (tijaabada qaaxada) oo lagu sheego inaad qabto qaaxada qarsoon ma lihid astaamo cudur oo ay sabab u tahay qaaxadu. Uma gudbinkartid adigu bakteeriyada dadka kale.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta khatar ah inaad qaado qaaxada wakhti dambe oo nololshaada ka mid ah, laakiin khatartaasi waa mid yar.

Daawada ka hortagga ah ayaa dadka la siiyaa xaaladaha qaarkood

Dadka qaarkood ee khatar ugu jira inay wakhti dambe u jiradaa cudurka ayaa la siiyaa daawo ka hortag ah. Waxay inta badan khusaysaa xilliga uurka iyo dhalmada ka dib, carruurta iyo dhalinyarada, iyo sidoo kale dadka uu nidaamka difaaca jirkoodu daciif yahay, tusaale ahaan dadka kansarka laga daaweeyo, daawada sonkorta ee insuliinta, cudur kelyo xanuun khatar ah. Daawada ka hortagga ayaa mararka qaarkood sidoo kale la siiyaa dadka dhibaataada ugu jiray inay ku dhacikarto qaaxadu.

Waxa adiga lagugula talinayaa daawada ka hortagga

Waxaad adigu qabtaa qaaxada qarsoon oo dhakhtarkaagu wuxuu kugula talinayaa daawada ka hortagga cudurka. Waxa sidaa loo samaynayaa si loo yareeyo khatarta ah inaad mustaqbalka u jirato cudurka qaaxada.

Haddii aad yeelato qufac muddo dheer ah (in ka badan saddex toddobaad), dhidid habeenkii, qandho ama uu miisaankaagu adiga oo aan doonayn uu hoos u dhaco, la xiriir dhakhtarkaaga si lagaaga baadho cudurka qaaxada.

Warbixinta xiriirka

Magaca qaybta qaabilaadda (*Namn på mottagningen*)

Waad la kulantay (*Du har träffat*)

..... Dkhatarka (*Läkare*)

..... Kalkaaliso caafimaad (*Sjuksköterska*)

Lambarka telefoonka/wakhtiga telefoonka ee qaybta qaabilaadda
(*Telefonnummer/telefonid till mottagningen*)

.....